

Ilaalinta Caalamiga ah Helitaanka gargaarka sharciga



Haddii aad codsanayso ilaalin caalami ah, waxaa jira xeerar cusub oo la dhaqan geliyey, sababtoo ah Ireland waxay wax ka beddeshay sharciga la xiriira ilaalinta caalamiga ah 12ka Juun 2026.

Waxaa muhiim ah inaad ogaato in haddii aad codsanayso ilaalin caalami ah laga bilaabo 12ka Juun 2026:

1. Waxaad xaq u leedahay la-talin sharci;
2. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato gargaarka sharci.



Labadaba waxaa bixiya Guddiga Gargaarka Sharciga (Legal Aid Board).

Waa maxay La-talin Sharci (Legal Counselling)?

La-tashiga sharcigu wuxuu ku siinayaa macluumaad guud iyo hagitaan ku saabsan habraacyada lagu baarayo codsigaaga.

Waxa kale oo lagu siinayaa hagitaan ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga inta lagu jiro habka baaritaanka, iyo hagitaan ku saabsan sida loo buuxiyo codsi qoraal ah oo loogu talagalay ilaalinta caalamiga ah.

La-talin sharci (Legal counselling) ma aha talo sharci (legal advice).



Coimisiún na hÉireann um Chearta
an Duine agus Comhionannas
Irish Human Rights and Equality Commission

 ihrec.ie/your-rights

Ka waran haddii aan rabo talo sharci?

'Gargaarka Sharci' waxaa ku jira Talo Sharci iyo Matalaad Sharci. Si aad u hesho talo sharci, waxaad codsan kartaa gargaarka sharci.

Waxaad codsan kartaa talo sharci si lagu caawiyo inta lagu jiro habka codsiga, iyo in lagaa caawiyo diyaarinta wareysiga.

Gargaarka sharci waxaa sidoo kale ku jira matalaad sharci, haddii aad hesho go'aan diidmo ah oo ku saabsan codsigaaga ilaalinta caalamiga ah oo aad rabto inaad racfaan ka qaadata go'aankaas.

Sideen u codsan karaa Gargaarka Sharci?

Waxaad codsan kartaa gargaarka sharci marxalad kasta oo ka mid ah habka codsiga ilaalinta caalamiga ah.

Si aad u codsato gargaarka sharci, waxaad samayn kartaa mid ka mid ah kuwan:

1. Ka samee codsi gargaar sharci Guddiga Gargaarka Sharci Adeegga La-talinta Sharci ee Citywest (Legal Aid Board Citywest Legal Counselling Service), oo ku yaal Xarunta Soo-dhoweynta ee Citywest (Citywest Reception Centre) halkaas oo aad ka sameyso codsigaaga ilaalinta caalamiga ah; ama
2. La xiriir mid ka mid ah Xarumaha Sharci ee Guddiga Gargaarka Sharci ee ku takhasusay Ilaalinta Caalamiga ah (Legal Aid Board International Protection Law Centres).

Si aad u hesho faahfaahinta xiriirka ee Xarumaha Sharci ee Guddiga Gargaarka Sharci ee ku takhasusay Ilaalinta Caalamiga ah, booqo bogga internetka ee Guddiga Gargaarka Sharci.

